



Oslo kommune  
Utdanningsetaten

2014/2015 heerka Oslo ee  
**WADASHAQAYNTA  
ISKUULKA - GURIGA**



# MAADDO IYO BARASHO

## MAXAAD KA FILI KARTAA ISKUULKA?

- Iskuulku wuxuu bixinayaa waxbarid waafaqsan sharciyada iyo manhajyada waxbarasho ee jira.
- Iskuulku wuxuu yaqaan heerka aqoonta ardeyga laga soo billaabo xannaanada carruurta iyo dugsiga hoose/ dhexe ee ardaygu ka yimid, arrintaas ayuuna ku saleynayaa waxbaridda.
- Iskuulku wuxuu ka shaqeynayaa si uu u siiyo ardeyda oo idil fursado isku mid ah si ay u hormariyaan kartidooda shakhsi ahaaneed iyo la shaqeynta kuwo kale.
- Iskuulku wuxuu dhiirigelinayaa jaceylka ardeyga ee barashada, wax ogaanshaha iyo kartida u fakeridda si dhinac walba ka eegid ah.
- Iskuulku wuxuu xaqiijinayaa in barayaashu u wada shaqeeyaan waxbaridda ardeyga.
- Shaqaalaha dugsiga oo idili waxay ahaanayaan cid lagu daydo oo la higsado.
- Ardeygu wuxuu helayaa hagid nidaamsan iyo uga waramid sida uu maaddo ahaan iyo bulshanimaba u sii fiicnaanayo. Ardeygu wuxuu kale oo la lahaanayaa baraha qaabbilsan wada hadal maaddeed.
- Dugsiga hoose/ dhexe wuxuu waalidka ugu yeerayaa wada hadal horumarineed labo jeer sanadkii Ardeygu wuxuu helayaa qiimeyn qoraal ah.
- Dugsiyada sare waxay wada hadal la yeelanayaan waalidka marka uu iskuulku billowdo iyo markii loo baahdo Dugsiyada sare waxay kale oo ay si joogto ah u qabtaan shirarka waalidka.

## MAXAY WADA SHAQEYNTA GURIGA- ISKUULKU MUHIIM U TAHAY?

*Wada xaajood wanaagsan oo u dhexeeya dugsiga iyo guriga ayaa aad muhiim ugu ah waxbarashada iyo ka helidda ardeyga ee iskuulka Wada shaqeyntu si isla mid ah ayey muhiim ugu tahay ardeyga 6 sano ha jiro amase 18 sano ha jiree. Aniga qudhaydu hooyo baan ahay, waana ogahay in jeceylka barashada iyo rabitaanka ardeygu ay khuseyso xiriirka u dhexeeya barayaasha iyo waalidka Annaga leh iskuulladana waxaan leennahay sharciyo iyo xeerar la raaco marka loo eego arrintaan.*

Anniken Hauglie, madaxa magaalada ee xagga aqoonta iyo waxbarashada



# MAADDO IYO BARASHO

## ISKUULKU WUXUU KA FILAYAA ADIGA WAALIDKA AH:

- Xaqiijisid in ardeygu lahaado dadaal waxqabasho, lana socotid hawlaha iskuulka (layliyo, wax la soo qoray soo gudbintood, imtixaanno iwm).
- la soo xiriirtid haddii ay kula tahay in waxbariddu aysan buuxineyn waxa uu ardaygu ama adiguba aad ka filaysay.
- hubisid in ardaygu waqtiga munaasibka ah yimaado, isaga oo nasan, quraacdii soo cunay, haystana cunto maalin-dugsiyeedka oo idil.
- la soconaysaa fasaxyada iyo maalmaha aanu iskuulku jirin, hubinaysaana in ardeygu yimaado iskuulka maalin walba sanad-dugsiyeedka.
- Ilaalinaysaa in ardeygu raaco xeerarka iskuulka, xushmeeyaana dadka iskuulka jooga oo idil.



# AMNI IYO KA-HELID

## MAXAAD KA FILI KARTAA ISKUULKAAGA?

- Ardeyda oo idili waxay iskuulka ka dareemi soo dhoweyn iyo amni.
- Iskuulku wuxuu wada hadal joogto ah kala leeyahay waalidka aqoonta maaddo iyo bulsho ee ardeyga, waxayna helaan qiimeyn qoraal ah.
- Iskuulku wuxuu mar walba u furan yahay in waalidka kala shaqeeyo ka helidda ardeyga, uuna sameeyo waxqabad marka loo baahdo.
- Iskuulku sinnaba uguma dulqaadanayo dhibid joogto ah, gacan-qaad iyo cunsuriyadba, wuuna ka daba tagayaa haddii cid meel looga dhaco.
- Iskuulku wuxuu si nidaamsan uga shaqeynayaa in uu abuur bay'ad iskuul iyo mid fasal oo wanaagsan.
- Shaqaalaha dugsigu wey yaqaannaan ardey kasta, waxayna si dhow ula soconayaan bulshanimo ahaanta. Iskuulku xiriir buu sameynayaa haddii wax khaas ahi dhacaan.



## MAXAY WADASHAQEYNTA GURIGA-ISKUULKU MUHIIM U TAHAY?

*Wadashaqanta iskuulka iyo gurigu waa muhiim maxaa yeelay waxa ardayga u wanaansan ayaa muhiim ah Wadashaqeyn dhab ah, ahna sida ardeyga ugu wanaagsan waxay gacan ka geysnaysaa natiijo wanaagsan oo ah mid maaddi ah iyo mid bulshannimaba. Wadashaqeynta iyo ka qeybgelintuba waxay ku abuurayaan waajib iskaga dhigid ballaaran waalidka iyo sikuulka, waxay asaas fiican u noqonaysaa barashada ardeyda.*

Mona Bjelland, madaxa guddiga waalidka iskuulka Tonsenhagen

# AMNI IYO KA-HELID

## ISKUULKU WUXUU KA FILAYAA ADIGA WAALIDKA AH:

- Waxaad si firfircoon gacan uga geysanaysaa inaad ilmahaaga aragti wanaagsan ka siiso iskuulka, barayaasha, ardeyda iyo waalidkoodba.
- La soo xiriiraysaa iskuulka haddii uusan ka helin.
- Si firfircoon uga qeyb qaadanaysaa qabanqaabooyinka bulshanimo.
- Kala shaqeynaysaa waalidka kale ka helidda iyo amniga ardeyga.
- Waxaad qeyb ka qaadanaysaa masuuliyadda in ardeygu raaco xeerarka nimaad-samidda ee iskuulka.



## MAXAY WADASHAQEYNTA ISKUULKA-GURIGA MUHIIM U TAHAY?

*Shardi waxaa u ah wadashaqeyn wanaagsan oo dhex marta iskuulka iyo waalidka isla xiriir wanaagsan, oo lagu yaqaan wadaxaajood labo dhinac oo furfuran iyo macluumaad is dhaafsi Arrintaani waa lagama maarmaan si waalidiinta loogu xaqiijiyo gacan ka geysasho iyo go'aan la qaadasho wanaagsan.*

Knut Erik Brændvang,  
Maamule dugsigta Østensjø

# WADAHADAL IYO WADASHAQEYN

## MAXAAD KA FILI KARTAA ISKUULKAAGA?

- Heerka Oslo ee wadashaqeyn iskuul- guri la raaco.
- Iskuulku wuxuu leeyahay nidaam xiriir iyo war- isgaarsiineed oo wanaagsan.
- Waxaa laguugu yeerayaa ugu yaraan labo shir-waalid sanadkii.
- Iskuulku wuxuu xiiseynayaa aragtiyaahaga, xal buuna u raadiyaa, wuxuuna jawaab kaa siinaya su'aalahaaga.
- Waalidku wuxuu haystaa fursado uu saameyn ku yeesho, isaga oo u maraya xubnaha wada shaqeynta ee iskuulka Guddiga waalidka, doorashada bey''ad dugsiyeedka iyo golaha maamul ee dugsiiga hoose/ dhexe.
- Iskuulku wuxuu u isticmaalayaa turjubaan/ turjumid shirarka iyo wada hadallada haddi loo baahdo.



## MAXAY WADASHAQEYNTA GURIGA- ISKUULKU MUHIIM U TAHAY?

*Waxaa muhiim u ah bey'adda waxbarasho ee ardeyga in iskuulka iyo gurigu leeyihiin faham ay wadaagaan oo ah waxa muhiimka u ah barashada Wadashaqeyn wanaagsan oo ay waalidka iyo barayaashu isu arkaan ka-qeybqaatayaal siman waxay waxtar u tahay waxbarashada ardeyga Waalidka iyo iskuulku waa in ay ahaadaan sidiinnaga oo u leh hadaf muuqda ardeyga.*

Gunnar Aakhus, bare iskuulka Øraker

# WADAHADAL IYO WADASHAQEYN

## ISKUULKU WUXUU KA FILAYAA ADIGA WAALIDKA AH:

- Kala shaqeysid iskuulka si uu u xaqiijiyo xiriir iyo wargaarsiin socota.
- aad ka qayb qaadatid shirarka waalidka, wadahadallada horumarineed iyo shirarka kaleba, waqti fiican ka horna soo sheegtid haddii aadan imaan karin shir waqtigii lagu ballamay.
- Ka jawaabtid baaritaannadda isticmaalayaasha ee dugsiga.
- Ku soo wargelisid iskuulka dhacdooyinka saameynaya ardeyga iyo hawlaha iskuulka.
- Xushmaysid ardayda, shaqaalaha iyo madaxda iskuulka iyo waalidiinta kale, khaasatan marka la isla xiriirayo amase macluumaad la wadaagayo.



